Warqad warbixin ah

# Hal cunug-Labo Af

**Warbixino,Waanooyin iyo Talooyin Waalidka dan u ah.**

Verfasser: Prof. Hannes Scheutz, Universität Salzburg

## AFAFKA BADANI MA U DHIBAATA, MISE WAA U FURSAD CARUURTAYADDA?

Haddii uu cunugu sanooyinka ugu horeeya ee noloshiisa labo Af oo kala duwan ku barbaaro, waxay u fududeyneysaa waxbarashadda oo dhan sida Dugsiga(Iskoolka) iyo Xirfadaha kalaba. Sidaas darteed ayey Afafka badani caruurta u yihiin u fursad iyo waayo-aragnimo. Dhanka kale barashadda Afka labaad waxay caruurta u carbisaa una diyaarisaa Aayaha danbe ee noloshooda. Aalaba Afka labaad (Afka shisheeye) sida Afka-hooyo looma barto. Talooyinkaan soo socdaana waxey waalidka u fududeynayaan, sidey caruurtooda Afaf badan ugu barbaarin lahaayeen.

## AFKEE AYAAN CUNUGEENNA KULA HADALNAA?

Kula hadal cunugaaga Afka aad adigu sida wanaagsan ugu hadashid. Gaar ahaan Afka aad adigu(Waalid ahaan) kusoo kortey ee aad yaraantaadii baratey. Run ma ahan, in Barashadda Afku caruurta u fududeyneyso, haddii ay Waalidku caruurtooda Germal kula hadlaan. Haddii ay Labada waalid labo Af oo kala duwan ku hadlaan, cunugu marxaladdaas waa ka gudbi karaa.
Waxaase lama huraan ah in Waalidka iyo cunuguba qorshe ay isla ogyihiin sameytaan: Tusaale ahaan: waa in uu Cunugu dhihi karaa: Aabbe waxaan kula hadlaa Somali Hooyana Deutsch

## BARASHADDA AFKA LABAAD, MA WAXAA LA XARIRA DHIBAATO GAAR AH?

Badanaaba waxay Waalidku ka cabsadaan, in cunugoodu labada Af midkoodna si wanaagsan u baranwaayo. Balse waa suurtagal in caruurtu labo ama sadex Af bartaan. Waase, haddii intey wali yar-yar yihiin lagu dadaalo isla markaana ay si joogto ah Afafka ugu hadlaan.
Hadduu cunugu Afaf badan ku koro, laga yaabee intuu erayadda ama sadaradda ugu horeeya si wanaagsan ugu hadlo ay muddo qaadato, laakiin taasi wax door ah Aayihiisa danbe kama ciyaareyso. Waxaa dhacda xattaa inuu labada Af isku dhexdaro oo isku qaso, waayo waxa cunugu isku bedelayaa erayadda ama naxawaha labada Af: Tusaale ahaan: erayo Somali ah ayuu ku darayaa kuwo Germal ah. Laakiin isku dhex Qaska erayaddu waxay dhumaysaa oo ay meesha ka baxeysaa marka uu cunugu labadda Af si wanaagsan u barto. Markaa waxii ka danbeeya

labada Af wey kala leexanayaan. Haddiise ay Caruurtu Afka labaad dib ka bilaabaan, isku darka labadda Af muddo dheer ayey qaadneysaa . Tusaale ahaan ku dhawaaqiddii afka hore ayay waxay u gudbinayaa Afka cusub, oo ereyadda Afka cusub iyo dhawaaqii Afkii hore ayay isku derayaa.Waxaana codkiisa laga maqlayaa erayo Germal ah waxaana laga dhadhansanayaa ku dhawaaqiddii oo Somali ah.

## SIDEE AYAAN CUNUGAYAGA BARASHADDA LABADA AF UGU DHIIRIN GELIN KARNAA?

Caruurta halkaan ku kortey aad ayey lama huraan u tahay iney Afka-germalka bartaan.Waayo, barashadda Afku waxay Caruurta u fududeyneysaa Dugsiga iyo waxbarashadda oo kale oo dhan. Haddii uu cunugu Aqoonta Afkiisu aad u wanaagsantahay guul ayuu ka garayaa Dugsiyadda iyo farmasamadda gacantaba. Hadii uusan cunugu intuu wali yaryahay Afka si wanaagasan u baran, wey adag tahay, siduu markuu weynaado Afka ku bartaa. Hadii uusan Afka Aqrin karin ama uusan Qori karinna lagama yaabo inuu imtixaanadda gudbo ama xirfad barto, haddii uu xattaa si wanaagsan Afkii ugu hadli karo. Waayo barashadda xirfaddu waxay ku xiran tahay Qorista iyo Aqriska. Taasna waxa loola jeedaa in Aayaha cunugu uu ku xiran yahay Barahadda Afkawadanka uu ku nool yahay,Tusaale ahaan: Austriya-Deutsch. Haddaba talaabada ugu haboon eeWaalidku qaadi karaan waa ayagoo inta Cunugu wali yaryahay ku ababiya barashadda Afka ayagoo adeegsanayaa Maqalka,Muuqaalka iyo ku hadakalba. Waxyaabaha u sahlana waxaa ka mid ah iney Caruurtu xariir la yeeshaan Caruurta dadooda iyo dadka waaweyn ee Afkooda Hooyo Deutsch ka yahay. Isla markaana ku barbaaraan maqalka, aqriska iyo ku hadalka Germalka. Waxaa ayaduna lama huraan ah, in sida ugu dhaqsaha badan Ilmaha xannaanadda Caruurta loo geeyo. Dhaqsaha uu cunugu barahsadda Afka ugu bilaabo ayuu dhaqsana ugu baranayaa. Waxay kaloo Waalidku caruurta tusi karaan lama huraanimadda Afka. Markey Caruurtii arkaan waalidkii oo Afkii baranayaa Taasina waxay keeneysaa iney Caruurtiina ku daydaan. Sidaas darteed ayeyWaalidku Caruurtooda u yahiin tusaale wanaagsan ama xun.
Markey Waalidku arkaan caruurtooda oo labada Afba si wanaagsan ugu hadlaya, ayay dareemayaan iney dadaalkoodii ku guuleysteen.Cunugiina waa ku farxaya, inuu labo Af ku hadlo. Waalidkii iyo Cunugiina markaas ayay ogaanayaana iney wadada saxda ah ku socdaan.
Haddey waalidku Deutschkurs dhigtaan oo ay caruurtooda weydiiyaan: Ii sheeg ereygaas maxaa Afka -Germalka lagu yiraa? Waxay taasina cunuga u tahay dhiiri gelin weyn, oo waxa uu noqonayaan qof wax bartey oo aqoontiisa loo baahanyahay. Waalidkuna wey ku faraxayaan marka cunugoodii yaraa labadda Af isku bedello ama isku turjumo. Taasina waxay caddeyneysaa in Waalidka iyo caruurtuba dariiqa wanaagsan ku socdaan, dadaalkoodii horana miro dhaley.

## MAXAAN KU HORMARIN KARNAA BARASHADDA AFKA CUNUGEENNA EE JOOGTADDA AH?

Reerka dhexdiisa ayey caruurtu Afkooda ugu horeeya ku bartaan. Barashadaasina waa mid aan Baaraandeg gooni ah u baahneyn. Tusaale ahaan:Ayaga oo aan Erayadda iyo naxwahaba si gooni loo barin ayay Afkii ku hadlayaan. Waalidba

waalidkuu ka dadaal badan yahay oo caruurta ka dhiri gelin ogyahay ayay Caruurtooduna Afkii ugu baran ogyihiin. Cunugu si tartiib ah ayuu u bilaabayaa inuu waxa uu maleynayo iyo fekerkiisaba hadal ahaan u soo gudbiyo. Aqriska iyo Qoristuba ma ahan sida kaliya ee cunugu Afka ku barto, waxaa kaloo barashadda Afka qeyb weyn ka qaata Buugaagta Caruurta ee sawiradda leh, waase lagama maarmaan ah in waalidku Ilmaha buugaagtaas la fiirsadaan oo ay tusaan: Waalidku waa iney dhegeystaa marka Cunugoodu waxii uu maanta soo arkey uga sheekeynayo, isla markaana waa in waalidku Caruurta uga sheekeeyaan, dhalinyaranimadoodii iyo shaqadda ay hadda hayaan. Waxaa lama huraan ha, in Waalidka Buugaagta sheekooyinka ee Caruurta Ilmaha u aqriyaan. Dad badan waxay rumeysanyihiin, in Fiirsashadda Telefishinku caruurta barashadda Afka u fududeyso, waxaase la ogaadey ineysan taasin run aheyn, waayo: Cunugu waxaa dareenka oo dhan raacinayaa Sawiradda dhaq-dhaqaaqaya, dhegehiisuna uma furna waxa lagu hadlayo. Bedelkii Telefishinka waxaa la isticmaali karaa CD ama Cajaladaha laduubey.

## MAXAA LA YEELAA, HADDUU CUNUGU RABO INUU HAL AF KALIYA KU HADLO?

Waxaa marmarka qaarkood dhici karta in Cunugu hal- Af kaliya isticmaalo. Tusaale ahaan, hadii Waalidku Af-soomaali looga hadlo, waxaa uu ku hadlayaa Jarmal oo kaliya.. Taasina waa wax dhici kara. Laakiin Waalidku waa iney sida caadiga u aheyd Afkooda ku hadlaan kuna qasbin cunuga inuu somali ku hadlo. Waxaa hubaal ah inuu mar uun Soomaaligii uu shaley diidayey ku hadlo. Waxaa kaloo dhici karta in Cunugu jecleysto inuu soomaali kaliya ku hadlo, oo uusan Jarmalkii Kindergarten iyo iskoolka lagu baranayey uusan wax horumar ka sameyneyn. Halkaas waa in Waalidku is weydiiyaan, sidey Afka Jarmalka ee muhiimka ah caruurtoodu u baran lahaayeen. Badanaaba Dhibbaatadu waa ayadoo, Canugu erayo ku filan oo Jarmalka ah aqoon iyo asagoo dedaalkiisa badnaa miro wanaagsan dhalin.